

Awood-gelinta Dumarka ee qaybta Tamarta ee Somaliland



Hal Kilowatt-hour oo koronta ah waxay Somaliland ka joogtaa \$1, waana mid ka mid ah qaymaha ugu qaalisan wadamada Afrika. Ma aha wax lala yaabo in maamulka Somaliland ay mudnaanta siiso maalgalinta, casriyeenta iyo horumarinta waaxda tamarta dalka, stratijiyadan ayaa ah tan kali ah ee lagu guulaysankaro haddii la tixgaliyo kaalinta haweenka.

Dumarku waxay leeyihiin door muhiim ah oo ay ka ciyaaraan qaybta awoodda tamarta, tusaale ahaan shirkadda GEEL waxa ay u abuurtay haweenka ku jira Kooxda Tamarta, tababarro, aqoon isweydaarsi iyo dood cilmiyeed la xiriirta xirfadda waaxda tamarta, haweenka waxa ay la jaanqaadaan farsamada casriga ah, waxayna la wadaagaan ragga horumarinta khayraadka dabiiciga ah.

"Waxaan rajeynayaa in aan wax badan ka barto isbeddelada ka dhacaya dalka oo aan goobjoog u ahaado soo bandhigidda iyo wargalinta akhbaarta marka ay dhacayaan," ayey tiri Cawo Mukhtar Cali, oo ah ardayad wax ka barata Jaamacadda Hargeysa, waaxda farsamada korontada, waxayna rajeyneysaa in ay ku biirto aqoonyahanada ku takhasusay una leh khibrad dheeri ah waaxdan. "Waxaan wax badan ka bartay qaybtan, waxaan ku faraxsanahay inaan xiriir la sameeyay haweenka waaxdan, taas oo aan aaminsanahay inay tahay hanti."

Marka lagu kordhiyo in ay noqoto mid wax ku ool ah oo loogu talagalay in injineerada mustaqbalka la jaanqaaddo, kooxdu waxay ku dadaaleysaa inay furto albaabyo abuuraya fursado la taaban karo oo loogu talagalay injineerada doonaya inay gacan ka geystaan horumarinta warshadaha. GEEL waxay la shaqeysaa haweenka da'da yar si ay u aqoonsadaan meelaha ay xiiseynayaan iyo xirfadaha ay doonayaan, si ay u fuliyaan qorshahooda horumarineed, xirfadaha, iyo inay raadsadaan fursado shaqo abuur tayo leh.

Waxaan doortay injineer si aan uga qayb qaato horumarka waddankeena," ayey tiri Asma Ibraahim Aadan, oo ah ardayad wax ka barata Jaamacadda Hargeisa, waaxda injineeria ayadoo ka qayb qaadanaysa barnaamij aqoon isweydaarsi ah ee ay fududeeyeen GEEL.

"Waxaa jira haween aad u yar oo ku biira mihnada injineernimada ee Somaliland; waa muhiim in haweenku ku lug lahaadaan kobcinta dalkeenna."

Isku shaandhaynta jinsiga ee qaybta tamarta ma abuurayso fursadaha dumarka oo kali ah, balse sidoo kale waxay xoojisaa horumarka warshadaha, daryeelka caafimaad iyo waxbarashada, waxayna si guud u saameysaa fursadaha ganacsiga haweenka iyo ujeedooyinka horumarineed ee qaranka.

Waxaan u riyaaqayaa qaabka shaqo ee tababarka," ayeey tidhi Asma, iyada oo saddex bilood un oo waayo-aragnimo leh. "Waxaan arkay masiinno iyo hawlgallo aan maqlijiray kaliya, hadda waxaan aad ugu faraxsanahay inaan ku biiro qaybta."

Xubno badan ayaa ka shaqeynaya fursado ay ku helayaan shirkado firfircoon ee warshadaha, taas oo ay hanuuniyeen oo ay dhiirrigeliyeen aqoonyahanno ay la kulmeen. "Waxaa muhiim ah in la baro gabdhaha da'da yar si ay u noqdaan kuwo hufan oo hami leh," ayeey tiri Roda Rageh, oo ah wakiilka wax soo saarka dadka ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta ee Somaliland, iyadoo ka hadlaysa kulan tababareed. "Waxaana ku jira kalsooni lagu caddaynayo in aysan kali aheyn."

Ilaa hadda, GEEL waxay qabatay afar tababarood oo loogu talagalay 12 gabdhood oo ka soo jeeda jaamacadaha Somaliland waxayna fududeeyeen laba goobood oo tababar ah. GEEL waxay sidoo kale diyaarisay labiska amaanka gabdhaha oo loogu talagalay haweenka, taas oo ah tii ugu horreysay ee laga sameeyo Somaliland, waxayna bixisay qalab ilaaliya amaanka shakhsiga iyo guudahaan xubnaha kooxda.